

<p><b>Dacwada iyo Macluumaadka Sarkaalka:</b></p> <p>Lambarka Kiiska: _____</p> <p>Magaca Sarkaalka: _____</p> <p><b>Waaxda:</b> _____</p> <p>_____, Vermont _____</p> <p>802-_____-_____</p> <p><b>Xafiiska Qareenka Gobolka - Degmadda:</b> _____</p> <p>_____, Vermont _____</p> <p>802-_____-_____</p>	<p><b>*Macluumaadka Qofka laga shakisan yahay:</b></p> <p>Magaca Eedayanaha: _____</p> <p>La xidhay: _____Haa _____Maya</p> <p>Waxaa lagu shaacin doonaa xigashada: _____Haa _____Maya</p> <p>Taariikhda Keenida maxkamadda: _____</p> <p>Macluumaadka waa lahayaa iyaddoo ay sababto: _____</p> <p>_____</p> <p><b>*Dhammaystir KELIYA haddii uu yahay dembiile qof wayn ah ama dembiila "Qoran" – 33 VSA 5204(a)</b></p>
--	--

## XUQUUQDAADA SIDII DHIBANAHA FALKA DEMBI GUDAHA VERMONT

Sidii dhibanaha falka dembi, ama dhibanaha xubin qoyska ah, waxaad dareemi kartaa wareer, caawimo la'aan, cadho, ama xataa baqdin. Waxaa jira adeegyo bilaash ah iyo taageerooyin si lagu caawiyo. Dad badan ayaa ka shaqeeya nidaamka kuwaas oo daryeela oo ay ka go'an tahay inay adiga ku caawiyaan. **Sidii dhibanaha falka dembiga ah, waxaad leedahay xuquuq!**

### **Xaqa Wax lagu doorto**

- Waxaad dooran kartaa sida aad uga qayb gasho haddii dacwadaadu hore u socota.
- Ka jawaabi maysid wax su'aalo ah oo ka yimi qof ka baxsan qolka maxkamadda ama dhaarta caddaynta wadata. Caddaynu waa nidaam rasmi ah halka aad ku bixiso caddayn diiwaan gashan, dhaar.

### **Xaqa U doodista**

Haddii eedayanaha dacwad lagu oogo, waxaa lagu magacaabi doonaa Qareenka Dhibanaha oo ka socda xafiiska Qareenka Gobolka. Qareenkaagu waxa uu bixiyaa taageerada iyo macluumaadka oo waxa uu kaa caawiyaa:

- Fahanka xuquudaada;
- Dhammaystirka warqaddahaaga shaqo;
- Codsiga taageerada maaliyada wixii ah khasaaraha dembiga la xidhiidha ee loo qalmo.
- La xidhiidhida sharci fulinta iyo qareenada iyo
- Kugu wargeliya dacwada maxkamadda.

**Qareenkaagu adiga ayuu halkaas u joogaa!** La xidhiidh su'aalo kasta ama walaacyo kasta oo aad qabto.

### **Xaqa loo leeyahay Badbaadada**

Haddii aad qabto walaacyo ku saabsan badbaadadaada, soo wac wakaalada sharci fulinta marka koowaad. Ka dib soo wac Qareenka Dhibanahaaga. **Way ku caawin karaan!**

### **Xaqa in lagu Maqlo**

Waxaad xaq u leedahay inaad ka hadasho gudaha nidaamka maxkamadda haddii aad doorato. Tan waxaa ku jiri karta la wadaagida fikradahaaga Qareenkaaga Dhibanaha, qorista Warbixinta Saamaynta Dhibanaha, iyo ka hadalka maxkamadda xaga xukumida.

### **Xaqa Kaalmada Maaliyada**

Barnaamijka Magdhowga Dhibanaha waxa uu bixiyaa kaalmada xadidan ee maaliyada ee dhibnayaasha dembiga. Khasaaraha maaliyada waa inay ahaataa natiijada tooska ah ee dembiga oo aanay daboolin ilaha kale, sida caymiska. Waxaad heli kartaa kharashyada markhaatiga iyo kharashyada maylasha la socday haddii laguugu yedho sidii markhaatiga ama aad dalbatay inaad soo xaadiro dhegaysiga maxkamadda. Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan barnaamijkan, la xidhiidh Xarunta Vermont ee Adeegyada Dhibanaha Dembiga lambarka 800-750-1253.

*Waxaad xaq u leedahay inaad dalbato magdhow!* Maxkamaddu waxay dalban kartaa magdhowga khasaaraha aan caymiska lahayn sidii qayb ka mid ah xukunka eedaynaha. Aad ayay u muhiim tahay in la kaydiyo dhammaan risiidhadaada. Qareenka dhibanahaaga waxay kaa caawin kartaa sheegashadaada, ama waxaad soo waci kartaa Qaybta Magdhowga lambarka (802) 241-4688.

### **Xaqa Macluumaadka iyo Wargelinta**

Haddii eedaynaha dacwad lagu soo oogo, waxaad xaq u leedahay in laguugu wargeliyo marka dacwadaada hore u soco – xataa ka dib marka la xaliyay. Waxaad haysataa xuquuqda kale. Xadka ilaa xuquuqaha la heli karo waxay ku xidhan tahay sifada dembiga la soo oogayo. Waydii Qareenkaaga dhibanaha waxa ku saabsan xuquuqda gaarka ah ee macluumaadka iyo wargelinta markaas waxaad ogaan kartaa waxa la filanayo. Qareenkaagu waxa uu kaa caawin karaa inaad fahanto fikradahaaga.

Waxaad sidoo kale soo geli kartaa diiwaanada qaarkood ee xaaladaada. La xidhiidh waaxda sharci fulinta ee foomkan si aad wax badan u barato.

---

## **DHIBANAYAASHA RABSHADA HOYGA IYO RABSHADA GALMADA WAXAY LEEYIHIIN XUQUUQO DHEERAAD AH.**

Barnaamijkaaga shabakadaada maxaliga ah ee Vermonta waxa uu taageeraa dhibanayaasha iyo samata baxayaal ee hoyga iyo rabsahda galmada. Taageeradan waxaa ku jiri kara: khadka taageerada bilaashka ah iyo qarsoodiga ah 24/7, ka caawinta nidaamka sharciga ah, maaliyada, u doodista caafimaadka iyo caafimaadka gaarka ah, ka caawinta helida hoyga gurmada ah, iyo kaalmada soo xaraynta amarka ilaalinta. Adeegyada dheeraadka ah waxaa laguugu heli karaa *kharash la'aan* haddii aad tahay dhibanaha rabshada galmada. Lagaagama baahna inaad ka warbixiso dembiga. La xidhiidh barnaamijkaaga maxaliga ah lambarka hoos ku qoran.

### **Shabakada Network ee Ku lidka ah Rabshadda Guriga iyo Galmada**

**Rabshadda Guriga 24-Khadka tooska ah: 1-800-228-7395**  
**Rabshada Galmada 24-Saac Khadka tooska ah: 1-800-489-7273**

*Khadadka tooska ah waa qarsoodi wata dhowr ka reebitaano ah.*

*Si aad u barato wax badan oo ku saabsan ka reebitaanada la hadal khadka tooska ah ama ka dood wax ku saabsan walaacyadaada marka koowaad.*

**Barnaamijka shabakadayda maxaliga ah waa:** \_\_\_\_\_

Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka Shabakada ugu dhow bogga  
<https://www.vtnetwork.org/>

Qaabkan sidoo kale waxaa laga arki karaa [www.ccvs.vermont.gov](http://www.ccvs.vermont.gov) oo waxaa laga heli karaa qaabab kale marka la codsado. Macluumaadka dheeraadka ah, la xidhiidh Xarunta Vermonta wixii ah Adeegyada Dhibanaha Dembiga websaydkan ama 1-800-750-1213.